Isbeddellada Guud ee Ugu Muhiimsan

Xaruntii WFP ee Waajid, gobolka Bakool, ayaa ay maliishiyo hubeysani soo weerartey 16kii Agoosto. Weerarkan ayaa ah kii afaraad oo xarun ay Qaramada Midoobey ku leedahay Soomaaliya si toos ah loogu beegsado muddo laba bilood gudahood ah. Ku-simaha Madaxa Qaramada Midoobey iyo Xiriiriyaha Bani'aadmanimada ee Soomaaliya, Mudane Graham Farmer ayaa soo saarey war-saxaafadeed uu ku cambaareynayo weerarka. Waxa uu ugu baaqey dhammaan dhinacyada in ay oggolaadaan in si caqabad la'aan ah uu gargaarka bani'aadamnimada u gaaro dadka u baahan. Hawlihii WFP ee xafiis-hoosaadka Waajid ayaa socda iyada oo barnaamijyada quudinta dheeriga ah ee gobolkaa lagu gaarey 106,695 ka-faa'iideystayaal.

Maalinta Bani'aadamnimada Adduunka ayaa markii ugu horeysey loo dabaaldegey 19kii Agoosto. Farriin uu u direy Soomaaliya, ayaa Madaxa Qaramada Midoobey ahna Xiriiriyaha Bani'aadamnimada uu maalintaa u hibeeyey/ku ixtiraamey shaqaalaha bani'aadamnimada ee nafahooda ku waayey ama lagu afduubey Soomaaliya. Ilaa 43 shaqaalaha bani'aadamnimada ah ayaa la diley, 33 ayaana la afduubey iyada oo 13 ka mid ah weli la haysto. Mudane Farmer waxa uu sheegey in ay jirto handadaad joogto ah oo sii weynaaneysa oo lagu hayo hawlaha bani'aadamnimada waxaana uu ugu yeerey maamullada in ay aqoonsadaan muhiimadda ay leedahay in gargaarka nafaha lagu badbaadinayo la gaarsiinayo kuwa u baahan.

21kii Agoosto dagaal ayaa ka qarxay Muqdisho kaas oo ay ku dhinteen ugu yaraan 20 qof oo ayna ku dhaawacmeen in ka badan 40 kale, oo u badan rayid. In ka badan 250,000 oo qof ayaa ku barokacay Muqdisho ilaa intii uu dagaalku bilowday horraantii bishii Maajo. Qaybaha kale ee Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya, waxaa ka jirey iskudhacyo u dhexeeya kooxaha Islaamiyiinta ah iyo ciidamda dowladda.

16kii Agoosto, qof dabley ah oo aan la aqoonsan ayaa xabad ku diley qof u shaqeynayey NGO degaanka ah degsiimada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Km 13 ee waddada Afgooye. Ujeeddada ka dambeysa dilkiisa lama garanayo. Ilaa sagaal shaqaalaha gargaarka bani'aadamnimada ah ayaa lagu diley Soomaaliya ilaa bishii Jannaayo.

Aqoon-is-weydaasiyadii Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira (CAP) ee 2010ka ee Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya iyo Nayroobi ayaa magaalada Nayroobi ka kala dhacay 18kii iyo 20kii Agoosto. Aqoon is weydaarsiga Koonfurta/Bartamaha ayaa Nayroobi loogu qabtey nabadgelyo-xumada dalka ka jirta daraaddeed waxaana ka qaybgaley in ka badan 150 wada-hawlgalayaasha bani'aadamnimada ah. Aqoon is weydaarsiga Nayroobi waxa uu isu soo jiidey mudnaanaha ka kala jira soonanka kala duwan waxaana uu isu soo dhoweeyey mudnaanaha istiraatiijiyadeed ee shaamilka ah ee hagi doona waxqabadyada bani'aadamnimada ee 2010ka.

Waxqabadka

Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya, ayaa iyada oo qayb ka ah Barnaamijka Ka hortagga Duumada, waxa ay UNICEF oo sii marineysa la hawlgalayaasheeda ka qaybineysaa 21,000 marokaneeco ah degmada Saakow, ee gobolka Jubbada Dhexe iyo 38,000 oo ay ka qaybineyso degmada Wanla Weyn ee gobolka Shabbeellaha Hoose. Marokaneecooyinkan ayaa ay ka faa'iidesan doonaan ilaa 29,500 oo qoys, oo midkiiba helayo laba marokaneeco.

Toddobaadka dhexdiisa, ilaa 5,000 oo carruur ay da'doodu u dhaxay 6 – 36 bilood ayaa *Plumpy'doz,* oo ah cunto u diyaarsan in la cuno, ku heley Wanla Weyn. Cuntadaas oo aad u nafaqo badan ayaa gacan ka geysaneysa ka hortagga nafaqo-xumada ba'an.

Puntland, ayaa WFP iyo la-hawlgalayaasheeda degaanka ay barnaamij quudinta Dheeriga ah ka wadaan degmooyinka Gaalkacyo, Galdobob iyo Jarriiban halkaas oo ay kaga faa'iideysteen 16,814 carruur ka yar shan sano jir. Iyada oo qayb ka ah barnaamijka quudinta dheeriga ah ee la beegsado, ayaa ilaa 4,105 ka-faa'iideystayaal ay Gaalkacayo ku heleen 312 metrik ton halka 179 bukaannada qaaxada ah ay Garoowe iyo Gaalkacyo ku heleen ilaa 18 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah. Gobolka Mudug, ilaa 19,518 qof ayaa heley 247 metrik ton oo cunto ah taas oo hoos imaneysey barnaamij cunto-tababar-ku beddelo ah iyo10,278 metrik ton oo ay kaga faa'iideysteen cunto-shaqo-ku-beddelsho ahaan.

16kii Agoosto, hay'addda *Mercy Corps* ayaa biyo-dhaamin ka bilowdey afar goobood oo abaartu saameysey oo ku yaalla gobolka Bari. Ugu yaraan 4,500 oo qof ayaa ka faa'iideysanaya waxqabadkan iyada oo celcelis ahaan qofkiiba loo qoondooyey 5 litir maalintii. Boosaaso, Puntland, ayaa UNHCR iyo la-hawlgalayaasheeda degaanka ay olole wacyi-gelin ah uga bilaabeen boqolaal qof oo doonaya in ay mujaajiriin noqdaan oo sugaya fursaddii ay Gacanka Cadmeed uga gudbi lahaayeen Yaman iyaga oo raadsanaya nolol tooda dhaanta. Buug ay ku jiraan macluumaad ku saabsan halista uu safarkaasi leeyahay ayaa la qeybiyey toddobaadka dhexdiisa.

Somaliland, ilaa 91,392 qof ayaa helaya taageero caafimaad iyo mid nafaqeyn oo ay ka mid yihiin; raashinka qoyska ee dheeriga ah iyo qaybinta xirmooyinka caafimaadka oo laga helayo wada-hawlagalayaasha nafaqada. Biyo-dhaamin degdeg ah ayaa ka socota 74 tuulo oo ka tirsan gobollada Sanaag, Togdheer, iyo Maroodi Jeex. Wada-hawlgalayaasha Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda ayaa dayactiraya/dhisaya 13 ceel (5 ka mid ah ay cusub yihiin), 36 lix biyo-xireenno ciid ka sameysan ah, 119 berkadood, iyo 200 ceel-gacmeed ah oo ay ka faa'iideysan doonaan in ka badan 220,000 oo qof. Intaa waxaa dheer in 104,490 qof oo kale ay helayaan taageero kala duwan oo fayadhworka ah oo ay ka mid yihiin bixinta musqulo iyo abaabulidda bulshada si ay u asturaan qashinka adkaha ah.

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 280 metrik ton oo cunto ah u qaybiyey 19,400 oo qof taas oo hoos imaneysey barnaamijyada quudinta hay'adaha iyo quudinta dheeriga ah ee gobollada Waqooyi Galbeed iyo Awdal ee Somaliland.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org.
Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org